

WARBIXIN SANADEED **WAX**
QABADKA GULED
FOUNDATION **2023**



Si ay u helaan fursad waxbarasho caruurta kasoo jeeda qoysaska saboolka ah Guled Foundation hadafkeedu wuxuu yahay in ey bixiso waxbarasho bilaash ah.

WARBIXIN SANADEED

2022 - 2023



GULED
FOUNDATION



FOLLOW US:
[@guledfoundation](https://www.instagram.com/guledfoundation)



Tusmo

Mahadnaq.....	1
Hordhac	1
Qaab dhismeedka Guud Guled Foundation.....	2
Fariinta Gudoomiyaha	3
Warbixinta Waxbarasho	4
Hordhac waxbarashada.	5
Diiwaanka ardeyda.	6
Ardayda Ku Guuleysatay Deeqaha Waxbarashada.	7
Kormeerka Waxbarashada.	8
Warbixinta Maaliyada	9
Hordhaca Maaliyadda.	9
Ilaha Dhaqaalaha.	10
Xaaladda Dhaqaalaha.....	10
Warbixinta Kulamada	11
Shirarka Golaha Sare (Board).	11
Shirarka Maamulka (Management Team).	11
Kulamada Gudiyada Gaarka ah.....	11
Qorshaha Mustaqbalka iyo Hiigsiga	12
Warbixin Kooban.	12
Qorshaha Dhaw.	12
Qorshaha Fog.	13
Gunaanad iyo Gabagabo	13

“Waxaan aaminsanahay in cunug
walba uu mudan yahey fursad
waxbarasho”

Mahadnaq


Waxaan halkan uga Mahad Celinayaa Dhammaan intii ka qayb qaadatay Hawsha Guled Foundation ey uheyso caruurta saboolka. Waxaa kale oo aan u mahad-celinayaa Hoggaanka hay'adda Heerarkisa kala duwan dadaalkii iyo Dhabar adaygii ay muujiyeen waqti badan ku bixiyeen inay ummaddooda ugu adeegaan si hagar la aan ah.

HORUDHAC

Kaddib is waraysi ka bilawday Shaqsiyaad kooban kuna baahay mujtamaceena Allah Mahadiis waxaa suura galashay in kulankii ugu horreeyey uu dhaco April 2020 kaas oo lagu magacaaby guddigii farsamo oo ugu horreyey. Kulankii xigay ayaa lagu go'aamiyey dhismaha hay'adda loona magac bixiyey sannadkii 2021. Isla sanadkaas waxaa la diiwaan galiyey hay'adda lana dhameystiray sharciyaddii iyo xeerarkii lagu hawl gali lahaa. Wacyi galintii bulshada, dhaqaale ururintii. Allah fadligiis waxaa soora gashay in sannad dugsiyeedkii 2022-2023 laga diiwaan geliyey iskuulada maadiga ah iyo dugsiyada Qur'aanka 100 Arday. Ardeydas oo isugu jira GABDHO iyo WIILAL oo inta badan agoon yihiin oo kala jooga Galmudug, Banaadir iyo Koonfur Galbeed. Dadaal dheer iyo bisayl umadeed kadib allah mahadiis waxaa suuragashay in Sannad dugsiyeedkaan 2023-2024 aan diiwaangaliney 130 Arday oo kale sidaasna ey ku noqotay ardeyda Guled Foundation eysiisay deeqda waxbarasho 230.



Qaab-dhismeedka Maamulka





Abdirahiim Nuur Warsame

Gudoomiyaha Guled Foundation

Qibrad 20 sano

Heerka Waxbarasho Master

2021 - ilaa iyo hada

Wuxuu heystaa Shahadooyinka Bachelor (NC State University) and Master (Washington State University)

Wuxuu leeyahey qibrad ku dhowaad 20 sano ah dhinaca telecommunications.

Gudoomiyaha Gobolka Texas ayaa 2020 u magacaabey in uu xubin ka noqdo gole sare ee gobolka Texas kala taliye horumarinta iyo waxqabadka la siiyo dadka naafada ah.



FARIINTA GUDOOMIYAHA

Bismillahi Al Rahman Al Rahim. Marka kowaad Allah ayaa mahada iska leh. Kadib waxaan u mahad celineynaa dadka muruq iyo maal intaba la garab taagan Hay'adda Guled Foundation. Hay'addan waxaa la asaasey daba yaqadii sandkii 2021. In ka yar labo sano waxey u fidisey waxbarasho ardey gaareysa 230 ardey. Kuwaas oo kala jooga Banaadir, Shabeelada hoose iyo Galmudug. Ardeydaan waxey is kugu jiraan agoon, masaakin iyo naafo. Waa kuwii ugu mudnaa in wax loo qabto. Somalia sida aan ogaheey kama jirto waxbarasho free kadib burburkii dowladii dhexe.

Maadaama eeysan jirin waxbarasho free ah waxaa ilmahooda eey wax bartaan qoysaska awooda in eey ka bixiyaan qarashka waxbarasho caruurtooda sidaas darteed caruur badan ayaan heysan waxbarasho. Waxaa loo abuurey Guled Foundation in eey caawiso qoysaska agoonta iyo danyarta aan awoodin in eey caruurtooda ka bixiyaan qarashka waxbarasho. Aad ayaan ugu faraxsaney in aan siiney deeq waxbarasho 230 ardey mudaddaas yar. Hay'adda meysan gaarteen horumarkan hadii eeysan heli laheyn taagerada balaaran eey ka hesho dadka muxsiniinta ah. Jazaakum Allah Qayran dhamaantiin!

Wa'billahi Towfiq,



HORDHACA:

Guled Foundation waxay u taagantahay in ay deeq waxbarasho oo iskugu jirta Dugsi Qua'an iyo waxbarasho maadi ah ilaa dugsi Sare siiso caruuraha saboolka ah oo aan awoodin in eey iska bixiyaan qarashaadka waxbarashada ayadoo mudnan gaar ah siineeyso agoomaha iyo naafada, si loo xoojiyo aqoonta jiilka soo koraya.

DIWAANKA ARDEYDA

Sanad dugsiyeedkaan 2023-2024 hayada waxay sameysay diiwaangalin guud inta ay ka howlgasho hayadu Galmudug, Koonfur Galbeed iyo Gobalka Banaadir waxaana lasoo diiwaangaliyay in ka badan 200 oo arday, kadib diiwaangalinta waxaa ka fariistay gudiga deeqda waxbarasho ee haayada si looga xulo tiradii ay haayadu ugu talagashay sanadkaan oo ahaa 130 ardey.




ARDAYDA KU GUULEYSATAY DEEQAHA WAXBARASHADA

sanadkaan 2023 deeqda waxbarasho waxaa helay 130z arday oo iskugu jira gabdho iyo wiilal kana koobnaa qooyas leh agoon iyo danyar.




Tirada Ardeyda Heshay Deeqda Waxbarashada



Diiwaan gelinta Ardeyda ee Banaadir





KORMEERKA IYO DABAGALKA ARADAYDA


Masuuliyiinta waxbarashada ee hay'ada ayaa awood u leh kor meerida dhamaan goobaha waxbarasho ay ardayda dhigtaan iyo sidoo kale dabagalka iyo qiimeynta nidaamka waxbarasho in uu yahay mid ku haboon ardayda. Sidoo kale waxa uu masuul ka yahay kawarqabka ardayga iyo waliba goobaha waxbarasho ay dhigtaan, ayadoo lagu kormeeri doono xiliyada xiisadaha ay jiraan iyo waqtiyada imtaxaanaadka lasiiyo ardeyda iyo mar walba oo sanad dugsiyeedka gabo gabo yahay

WARBIXIN NATIJOYINKA ISKUULADA

Sanadkaan waxaan sameynay kormeer aan ku tageynay iskuulada ardaydii sanad dugsiyeed kii hore 2022-2023 la diiwaangaliyay ardayda aan kormeernay tiradoodu waxay gaareysay 52 arday oo kala dhiganayay iskuulo kala duwan dhamaan markaan helnay natiijooyinkooda dhamaan ardayda wey wada baaseen.




Dugsiyada Maadiga Ah Ay Kala Dhigtaan Ardayda






Lab iyo Dhadig



Heerka Dugsi Quranka





WARBIXINTA MAALIYADDA

ILAHA DHAQAAL EEE GULED FOUNDATION

Misaaniyadda Guled Foundation ee Sanad dugsiyeedka 2022/23 waxay ka timid yabooh lacageed oo laga sameeyey kulamo dhaqaalo aruurin ah (Fundraising) oo Hay'addu qabatay. Waxaa jiray laba kulan oo lagu qabtay habka, fogaan araga (Zoom meeting), oo ay kasoo qayb galeen shakhsiyaad ku kala nool dalka guduhiisa iyo dibadiisa oo daneeya taakulaynta dadka nugul gaar ahaan waxbaridda agoonta, naafada, iyo ilmaha kasoo jeeda qoysaska saboolka ah.



KHARASHAADKA HAY'ADDU KA DABARTO ARADAYDA KU GUULAYSTAY DEEQDA WAXBARASHO

Guled Foundation waxay ka bixisaa ardayda ku guleestay deeqdeeda waxbarashada dhammaan lacagaha uga baxa waxbarashada sida Lagacta billaha ah (Monthly Fee), Labis ka lagu dhigto Goobaha waxbarashada, Bugaagta wax lagu barto, Baabuur raac ardayda qaarkood gaar ahaan kuwa baahiyaha gaarka ah qaba, iyo dhammaan wixii lacaga oo ardayga ay ku waajibiyaan goobaha waxbarashada.



Nidaamka **Maaliyadda** iyo **qarashka** qofka laga bixiyo marka la kafaala qaado **waxbarashadiisa**.

No.	Dugsi Quraan	Iskuul
01	Qarashka Dugsiga	Qarashka Iskuulka
02	Xurmaynta Kitaabka	Buugaagta Ardayda
03		Labiska Ardayda

Habka Maamulka Maaliyadda Hay'adda

Guled Foundation waxay leedahay Xisaab bangi (bank accounts) oo lagu soo shubo lacagaha loogu yabooho hay'adda, waxaana lacagtaas ka saari kara oo kaliya mas'uuliyiinta loo idmaday oo saxiixa ku leh Akoonka sida Hantidhowraha iyo Xoghaya Hay'adda oo Jeeg ay si wadajir ah u saxiixeen kaliya looga saari karo lacag Khasnadda hay'adda.

Sidoo kale, waxaa waxbixin maaliyadeed oo sadex biloodle ah loo gudbiyaa golaha sare ee Boardka Guled Foundation, dhamaadka sanad dugsiyeedkana waxaa la sameeyaa xisaab xirka hay'adda. Waxaa si joogto ah kormeer ugu sameeya dhaq dhaqaaqa maaliyadda Gudoomiyaha iyo gudoomiye ku xigeenka ha'yadda

WARBIXINTA KULAMADA

Si loo dar-dar geliyo howlaha hay`adda waxaa la qabtaa kulamo looga dodo fulinta howlaha taagan iyo kuwo looga hadlo qorsheynta himilooyinka hay`adda.

Kulanka Guddiga Maamulka (Management team meeting): waa shir la qabto todobaadkiiba hal mar, waxaana lagu qorsheeyaa howlaha maalinlaha ah ee hay`adda, sidoo kale waa kulan lagu daba-galo fulinta qorshayaasha hay`adda.

Kulanka Golaha Sare ee Hay`adda (Board of Directors meeting) waxaa laqabtaa 3dii bilood halmar. Waa kulanka lagu lafa-guro, laguna ansixiyo qorshayaasha hay`adda oo eey soo diyaariyaan Guddiga Maamulka (Management team).

Kulamada gaarka ah: Waa kulamada ay qaataan guddi-hoosaadyada hay`adda si ay u qorsheeyaan fulinta howlaha u yaalla, sida kulamada ay yeesheen Guddi-hoosaadka Waxbarashada, Guddi-hoosaadka Maaliyadda & Guddi-hoosaadka Deeq-ururinta, iwm.



Kulanka Gudigga Waxbarashada



Kulanka Gudigga Maamulka



HIIGSIGA DHOW

Hay'adda Guled Foundation waxey xooga saartey sidii waxbarasho loogu heli lahaa carurta Agoonta, Danyarta iyo Naafada. Mudo labo sano ka yar, waxaan ku guuleysaney in aan ka bixino qarashka iskuulada maadiga ah iyo Dugsi Quranka Ardey gaareysa ilaa 230 ardey oo kala jooga Gobolada Banaadir, Shabeelada Dhexe iyo Mamulka Galmudug.

Waxaan rajeyneynaa in aan sii wadno dadaalkeena ku aadan in aan u fidino Deeq waxbarasho caruurta ka soo jeeda qoysaska sabolka ah. Hay'adda Guled Foundation hadafkeeda waa in sare loo qaado waxbarashada caruurta mustaqbalka Somalia si jaahilnimada looga saaro dalka. Halheys waxaa jira ah: Cunug wax la barey waa cid dhan oo wax la barey, cid wax la bareyna waa wadan wax la barey.

Sanadkii 2022, waxaa heshiis la galney hay'adda Iftin Foundation oo aan iska kaashaneyno dhinaca waxbarashada maaadiga ah degaanada GalMudug. Iskaashigaan wuxuu noqdey mid lagu guuleystey.





HIIGSIGA FOG

Guled Foundation waxey hamineysaa in eey ka dhiso magallada Cadaaado Iskuul iskugu jira Dugsi Hoose/Dhexe/Sare bixinaya waxbarsho aad u sareysa oo la jaan qaadeysa iskuulada international ka. Iskuul kaan wuxuu diirada sarayaa STEM education oo ah Science, Technology, Engineering, and Math. Dhulkii lagu dhisi lahaa waan gadney. Waa dhul gaaraya ilaa 20 boos oo ah 20x20 calaa boos. Waxaan ku jirnaa processkii aan ku sameyn laheyn naqshadii iskuul ka. Insha Allah waxaan raheyneynaa in aan helno taageero balaaran hadii eey tahey mid local ah iyo mid international ah si aan ku dhaqan galino hadafka hay'adda Guled Foundation oo ah Cunug walba wuxuu mudan yahey in uu helo fursad waxbarasho. Waxaan jecelnahey in aan bilowno iskuul ka dhisidiisa sandka 2024.

Waa dhul gaaraya ilaa 20 boos oo ah 20x20 calaa boos



Guled Academy Science and Technology K-12 School Site

Album Photos



Visit Our Website
guledfoundation.org



Makkah Almukarramah Ave,
City tower Mogadishu



FOLLOW US:
[@guledfoundation](https://www.instagram.com/guledfoundation)

